Australian Government
Department of Immigration and Citizenship

Waxaan kaa caawin karaa barashada Ingiriiska

Barnaamijka Ingiriiska ee Soogalootiga Waaweyn

Maxaan u baranayaa Ingiriis?

Hadda waxaad joogtaa Australia muhiim ayayna kuu tahay inaad barato Ingiriiska.

Luqada Ingiriisku waa afka lagaga hadlo Australia. Dadka Australia joogaa waxay ku hadlaan luqada badan, laakiin si aad si buuxda uga qayb qaadato nololsha Australia waxaad u baahan doontaa inaad ku hadasho oo fahamto Ingiriiska. Ingiriis la'aan, way kugu adkaanaysaa inaad hesho shaqo oo aad madaxbanaanaato. Sidoo kale Ingiriiska waa loo baahan yahay haddii aad rabto inaad Australian noqoto.

Waa maxay Barnaamijkla Ingiriiska ee Dadka Waaweyn?

Barnaamijka, oo loo yaqaan AMEP, wuxuu bixiyaa barasho asaasi ah oo luqada afka Ingiriiska si uu uga caawmimo soogalootiga xaqa u leh iyo qaxootigu inay si fiican ula qabsadaan Australia.

AMEP waxay ku bari doontaa wax ka badan Ingiriis. Waxaad kaloo baranaysaa mujtamaca Australia, dhaqanka iyo caadooyinka. Waxaad la kulmi soogalooti kale, kuwaas oo laga yaabo inay leeyihiin waaya-aragnimo iyo hadafkaaga oo kale, waxaana laga yaabaa inaad samaysato saaxiibo cusub.

AMEP waa barnaamij ay dawladu kharajkeeda bixiso.

Xaq ma u leeyahay barnaamijka?

Waa laga yaabaa inaad xaq u yeelato haddii aad tahay qaxooti ama soogalooti degaya Australia lana siiyey fiisa joogto ah kuna hadlin Ingiriis. Soogalootiga qaarkood haysta fiisa ku meel gaara ayaa iyagana laga yaabaa inay xaq u leeyihiin inay ka qaybgalaan barnaamijka iyo weliba dhalinyarada qaarkeed u dhexaysa 15 iyo 17 sano da' ahaan si ay uga qaybgalaan barnaamijka.

Waxaad u baahan tahay inaad iska qorto adeegbixiyayaasha AMEP midkood lix bilood gudahood markaad Australia timaado ama aad helayso deganaanshaha. Waa inaad bilawdaa xiisadaha Ingiriiska hal sano gudaheed.

Waxaad ka baran kartaa Ingiriis AMEP ilaa 510 saacadood oo ah koorsada Ingiriis ilaa shan sanadood laga bilaabo bilawga taariikhda fiisadood ama tirada saacadaha ay ku qaadato inaad yeellato Ingiriiska shaqaynaya (hadba kan soo hormara).

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay waxbarasho siyaada ah haddii aad qabto baahi khaas ah oo dhibaato aad la kulantay intaadan wadanka iman ka hor (tusaale ahaan kadeed iyo jir dil) ama waxbarasha xadadan.

Intaas ka sokow, waxbarasho siyaada ah ayaa waxaa heli kara macaamiisha AMEP iyada oo lagu bixinayo barnaamijka loo yaqaan the Settlement Language Pathways to Employment and Training (SLPET). SLEPT waxay siisaa macaamiisha waxbarasho ku wajahan koorsooyin si looga caawimo inay bartaan Ingiriis khaasa oo meheradeed iyaga oo baranaya dhaqanka iyo habka goobaha shaqo ee Australia.

Muxuu noqon doonaa kharajka barnaamijku?

Ma jirto lacag laga qaadayo barnaamijka dadka xaqa u leh inay wax ku bartaan barnaamijkaan.

Yaa wax i baraya?

Ururada agagaaraha, oo loo yaqaan adeegbixiyayaasha, ayaa bixiya waxbarashada AMEP. Adeegbixiyayaashaasi waxay shaqaaleeyaan macalimiin loo tababaray barista ingiriiska kuwa ku hadla luqada kale.

Adeegbixiyaha agtaada ah ayaa kuu sheegi doona haddii aad xaq u leeadahay barnaamijka. Waxay kugula talin karaan habka ugu fiican oo aad ku baran karto Ingiriiska.

Waxay kuu raadin karaan ansixinta inaad dib u dhigato fasaladaada sababa la xiriira shaqo ama qoyska.

Adeegbixiyahaaga ayaa kugula talin doonaa koorsada ku fiican baahidaada. Waxay samaynayaan tan iyagoo ku salaynaya marxaladaha qoyskaaga iyo heerkaaga Ingiriiska. Waxay kaloo kaa caawin karaan inaad qorshayso daraaso ka badan.

Yaa carruurtayda ii haynaya kolkaan baranayo Ingiriiska?

Adeegbixiyahaaga ayaa u qabanqaabin kara daryeel ilmood oo lacag la'aana ilmahaaga intaad fasalka ku jirto. Daryeelka lacag la'aanta ah waxaa la siiyaa keliya carruurta aan dugsiga gaarin iyo waqtiga aad xiisada tegayso keliya.

Macluumaad intaas ka badan weydii xarunta AMEP ee daryeelka ilmaha ee ku taal xaashida xaqiiqada.

Xaggee wax ka baranayaa?

Adeegbixiyayaashu waxay bixiyaan koorsooyin waqti buuxa ah iyo kuwa waqti dhiman ah (maalinimo, habeenimo iyo Sabtiyaha iyo Axadaha) iyo meelo kala duwan oo ay ku jiraan dugsiyada iyo xarumaha dadweynaha sida masaajida iyo kaniisadaha.

Adeegbixiyayaashu waxay ku bixiyaan koorsooyin baadiyaha iyo gobolada iyo weliba magaalooyinka waaweyn.

Maxaa dhacaya haddii aanan iman karin?

Fogaan wax barashada

AMEP waxay leedahay barnaamijka barashada durugsan. Adeeg bixiyahaaga AMEP wuxuu ku siin karaa macluumaad intaas ka badan iyo talo ku saabsan koorsooyinka.

Barnaamijka waxaa lagu bixiyaa ama online ama barnaamij isku xiran isna daba jooga iyo qalabka dhegaysiga ayna ku jiraan isticmaalida buugta iyo qalabka maqalka iyo muuqaalka. Waxaad kaloo la yeellan kartaa xiriir joogto ah oo telefoonka bare aqoon leh. Waxaad u baahan doontaa inaad ku bixiso koorsada ugu yaraan shan saac asbuucii.

Waxyaallaha la qabanayo iyo xarakaadka waxa ku jira dhegaysiga raadiyaha, akhrinta jaraaidka iyo ii-dhehda, ka hadlida naftaada, weydiinta macluumaadka, buuxinta foomamka iyo qorida warqadaha.

Mashruuca Guri ku Barida

Haddii aad xaq u leedahay AMEP oo aadan awoodi karin inaad timaado xiisadaha, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad kula shaqayso bare guriga.

Baraha ayaa kaala hadli doonaa adiga sida uugu fiican oo lagu barto Ingiriiska uuna kaa caawimo inaad fahamto nolol maalmeedka Australia.

Adeeg bixiyahaaga AMEP wuxuu ku siin karaa macluumaad badan oo ku saabsan talada mashruucaan.

Inta aadan bilaabin xiisadaha AMEP

Inta aadan bilaabin xiisadaha AMEP waxaad u baahan doontaa inaad la samaysato ballan xarunta AMEP:

- Qiimaynta heerkaaga Ingiriiska
- Ka heshiiska inta saacadood oo aad wax baran doonto asbuucii iyo nooca xiisadaha aad iman doonto
- Ka hadlida baahida daryeelka ilmaha iyo waxa xarunta AMEP ay samayn karto si ay kuu caawinto
- Qaabaynta dhabada shakhsiyeed taas oo qeexaysa hadafkaaga waxbarasho iyo mihnadeed waxaad u baahan doonto inaad samayso si aad u barato una yeelato taas. Horumarkaaga ku wajahan gaarista hadafyadaada waa la diiwaangelin doonaa markaad ingiriiska sii barataba.

Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad intaas ka badan, la xiriir Wasaarada Socdaalka iyo Muwaadinka khadkiisa waxweydiinta ee ah 131 881 (qiimaha halkaad joogto meel kasta oo Australia ku taal).

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan AMEP, oo uu ku jiro adeegbixiyaha kuugu dhow, waxa laga hellaa www.immi.gov.au/amep

Haddii aad u baahan tahay caawimada turjubaanka, la xiriir Adeega Tarjumaada Qoraalka iyo Afcelinta (TIS) tel: 131 450 (qiimaha halkaad joogto meel kasta oo Australia ka mid ah). Waxayna bixiyaan adeegyada Tarjumida Qoraalka iyo Afcelinta 24ka saacadood, todobada berri ee asbuuca.